DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

XAFIISKA XISAABIYAHA GUUD

WARBIXINTA FULINTA MIISAANIYAD SANNADEEDKA BISHA MAY 2025

July 2025

WARBIXINTA FULINTA MIISAANIYADDA

Bisha May 2025

WAXAA SOO SAARAY WARBIXINTAAN

XAFIISKA XISAABIYAHA GUUD EE DAWLADDA

WAXAAD KA HELI KARTAAN WARBIXINTAAN BOGGA XAFIISKA XISAABIYAHA GUUD

www.oags.gov.so

Dhismaha Wasaaradda Maaliyadda
Degmada Shangani
Mogadishu – Somalia
Email: reporting@oags.gov.so

TUSMADA WARBIXINTA

HORDHAC 1

DHABTA DAKHLIGA IYO MIISAANIYADDA SANNADKA 2025..... 2

DAKHLIGA DAWLADDA BISHA MAY 2025 & 2024 3

DAKHLIGA CANSHUURAHA 5

DAKHLIYADA KALE 7

DEEQAHA DIBADDA 8

Dhabta Kharashaadka Jan-May iyo Miisaaniyadda Sannadka 2025 9

DHABTA KHARASHAADKA JANAAYO ILAA MAY, HAY'ADAHA DAWLADDA 13

KHARASHAADKA JOOGTADA AH 14

KHARASHAADKA MASHAARIICDA..... 14

Lifaaqa 1aad: Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Joogtada ah, Jan-May 2025 16

Lifaaqa 2aad: Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Mashaariicda Jan-May, 2025 37

Liiska Jaantusyada

Jaantuska 1aad: Dakhliga Dawladda – Bisha May 2024 & 2025 4
Jaantuska 2aad: Isbarbardhig Dhakhliga Gudaha – bilaha Jan-May 2024 & 2025 4
Jaantuska 3aad: Dakhliga Gudaha Jan-May 2025 5
Jaantuska 4aad: Dakhliga Canshuuraha Jan-May 2025 & 2024 7
Jaantuska 5aad: Isbarbardhig Deeqaha Dibadda Jan-May - 2024 & 2025 9
Jaantuska 6aad: Isbarbardhig Kharashaadka Joogtada - bilaha Jan-May - 2024 & 2025 11
Jaantuska 7aad: Kharashaadka Mashaariicda, Bilaha Jan-May - 2024 & 2025..... 11

Liiska shaxaha

Shaxda 1aad: Dhabta iyo Miisaaniyadda Dakhliga Jan - May 2025 2
Shaxda 2aad: Dhabta Dakhliga May 2025 & 2024 3
Shaxda 3aad: Iskudarka Dakhliga Gudaha ee Jan-May ee Sannadaha 2025 & 2024 5
Shaxda 4aad: Deeqaha Dibadda Jan-May 2025 iyo 2024 8
Shaxda 5aad: Dhabta Jan-May 2025 & Miisaaniyadda Kharashaadka Guud Dawladda, ... 9
Shaxda 6aad: Kharashaadka la bixiyey Bisha May 2025 iyo 2024 12
Shaxda 7aad: Iskudarka Kharashaadka la bixiyey Jan- May 2025 & 2024 13
Shaxda 8aad: Dhabta Kharashaadka, Hay'adaha Dawladda 14

HORDHAC

Warbixinta fulinta miisaaniyadda waa warbixin bille ah, waxayna faahfaahinaysaa fulinta ama dhaqangelinta miisaaniyad sannadeedka 2025. Waxayna isbarbardhig ku samaynaysaa dhabta dakhliga lasoo uruuriyey iyo kharashaadka dawladda ee la bixiyey sannadka gudihiisa iyo miisaaniyad sannadeedka dakhliga iyo kharashaadka Dawladda. Waxayna waafaqsan tahay miisaaniyadda sannadka 2025 oo ay ansixiyeen laba aqal ee baarlamaanka.

Kutalagalka hore ee miisaaniyadda waxaa loola jeedaa miisaaniyadda asalka ah ee ay labada aqalka ee baarlamaanka ansixiyeen oo aan waxba laga badalin, kutalgalka danbe waxaa loola jeedaa miisaaniyadda asalka ah oo loo kala wareejiyey miisaaniyadda hay'adaha qaar ama madaxyada miisaaniyadda ee hay'adaha dhexdooda.

Wadarta Dakhliga Gudaha ee miisaaniyad sannadeedka 2025 ayaa ah $**430M**, wuxuuna ka yahay **32%** wadarta miisaaniyadda dakhliga Dawaldda, halka wadarta deeqaha dibadda oo isugu jirta kab miisaaniyaddeed iyo mashaariic ee ku jiray miisaaniyadda ay tahay $**902M** oo **68%** ka ah wadarta dakhilga miisaaniyad sannadeedka 2025.

Wadarta Miisaaniyadda asalka ah ee Kharashaadka Joogtada ah ayaa ah $**628M**, waxayna ka tahay **46%** wadarta miisaaniyadda kharashaadka guud, halka Miisaaniyadda asalka ah kharashaadka mashaariicda ay tahay $**731M** waxayna ka tahay 54% wadarta miisaaniyadda Kharashaadka guud ee sannadka 2025.

Iskudarka Dakhliga Gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa May 2025 ayaa ahaa $**153M**, wuxuuna ka badan yahay **2%** Iskudarka dakhliga gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa May 2024. Sidoo kale iskubiirinta deeqaha dibadda ee la helay bilaha Janaayo ilaa May 2025 ayaa ahayd **$100M** waxayna ka hoosaysaa **9%** iskubiirinta deeqaha dibadda la helay bilaha Jaanaayo ilaa May 2024.

Wadarta miisaaniyadda kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2025 ayaa ahayd $**292M** waxayna ka badan tahay **11%** wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Jaanaayo ilaa May 2024.

Warbixintaan ayaa ka koobnaan doonto saddex qaybood. Qaybta koowaad ee warbixinta fulinta miisaaniyadda oo lagu faahfaahin doonaa dhabta dakhliga dawladda; Dakhliga Gudaha iyo Deeqaha Dibadda, iyadoo la isbarbardhigi doono dhabta dakhliga iyo miisaaniyad sannadeedka qaybaha dakhliga Dawaldda ka kooban yahay.

Qaybta labaad ee warbixinta waxaa lagu faahfaahin doonaa kharashaadka dawladda ee la bixiyey bilaha Jaanaayo ilaa May 2025, Iyadoo loo fiirinaayo waafaqsanaanta sida lagu ansixiyey miisaaniyad sannadeedka 2025. Waxaana loo kala qaadi doonaa kharashaadka dawaldda labo qaybood; kharashaadka Joogtada ah iyo kharashaadka mashaariicda.

Warbixinta qaybta saddexaad waxaa ku lifaaqan faahfaahinta isticmaalka miisaaniyadda ee hay'adaha dawladda, loona kala qaaday sida ay hay'adaha u fuliyeen kharashaadka joogtada ah iyo mashaariicda ee miisaaniyad sannadeedka 2025. Lifaaqa koowaad ayaa lagu soo bandhigi doonaa faahfaahinta isticmaalka hay'adaha ee miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah, lifaaqa labaad ayaa lagu faahfaahin doonaa isticmaalka hay'adaha ee kharashaadka miisaaniyadda mashaariicda 2025.

DHABTA DAKHLIGA IYO MIISAANIYADDA SANNADKA 2025

Miisaaniyadda Asalka ee wadarta dakhaliga ayaa ah $**1,331,969,583** oo la filaayo in ay dawladda soo uruuriso sannad maaliyadeedka 2025 gudihiisa. Miisaaniyada Dakhliga Gudaha ayaa ah $**430,341,430** oo **32%** ka ah wadarta miisaaniyad sannadeedka, halka deeqaha dibada la filaayo in la soo xareeyo ay tahay $**901,628154** oo **68%** ka ah wadarta miisaaniyadda dakhliga ee sannadka 2025.

Faah-Faahin	Dhabta May 2025	Dhabta Jan-May 2025	Kutalagalka Hore	% Fulinta
Dakhliga Gudaha & Deeqaha Dibadadda	**$63,187,058**	**$253,485,807**	**$1,331,969,583**	**19%**
Dakhliga Gudaha	**31,865,329**	**153,159,825**	**430,341,430**	36%
Dakhliga Canshuuraha	**24,368,257**	**113,061,621**	**295,289,259**	38%
Canshuurta Dakhliga & Faaiidooyinka	3,391,570	22,558,944	38,031,213	59%
Canshuurta Adeegga & Agabka	5,886,079	23,215,113	56,111,497	41%
Canshuurta Ganacsiga Dibadda	13,306,736	62,914,181	186,211,437	34%
Canshuuraha Kale	1,783,872	4,373,385	14,935,112	29%
Dakhliyada Kale	**7,497,072**	**40,098,203**	**135,052,170**	30%
DEEQAHA DIBADDA	**31,321,729**	**100,325,982**	**901,628,154**	11%
Deeqaha laba dhinaclaha	928,489	12,140,922	42,000,000	29%
Deeqaha Dhincacyada badan	30,393,240	88,185,060	859,628,154	10%

Shaxda 1aad: Dhabta iyo Miisaaniyadda Dakhliga Jan - May 2025

Shaxda 1aad waxay soo bandhigaysaa dhabta dakhliga la helay bilaha Janaayo ilaa May iyo miisaaniyad sannadeedka 2025. Wadarta dakhliga la helay bisha May ayaa ah $**63M**, Dakhliga Gudaha waxaa ka soo xarooday $**31.9M** una dhiganta **50%** wadarta dakhliga la helay bisha May, Deeqaha dibaddaa ayaa la helay $**31M** oo u dhiganta **50%** wadarta dakhliga la helay bisha May 2025.

Wadarta dakhliga la helay bilaha Janaayo ilaa May ayaa ah $**253M** oo **19%** ka ah miisaaniyad sannadeedka 2025. Dakhliga Gudaha ayaa lasoo uruuriyey $**153M** oo u dhiganta **36%** miisaaniyad sannadeedka dakhliga gudaha. Deeqaha Dibadda ayaa la helay $**100M** oo u dhiganta **11%** miisaaniyad sannadeedka 2025 ee deeqaha dibadda.

Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidada ayaa la helay bilaha Janaayo ilaa May dakhli dhan $**22M** oo u dhigma **59%** miisaaniyad sannadeedka canshuurtaan. Canshuurta Agabka iyo Adeegga ayaa la soo uruuriyey $**23M** oo ah **41%** miisaaniyadda sannadka, sidoo kale Canshuurta Ganacsiga Dibadda ayaa la helay $**62.9M** oo u dhiganta **34%** miisaaniyad sannadeedka 2025.

Deeqaha laba dhinaclaha ah ayaa la helay bilaha Janaayo ilaa May dakhli dhan $**12M** oo **29%** ka ah miisaaniyadda sannadka 2025, Deeqaha dhinacyada badan waxaa la helay $**88.2M** oo u dhiganta **10%** miisaaniyadda sannadka 2025.

DAKHLIGA DAWLADDA BISHA MAY 2025 & 2024

Dakhliga dawladda wuxuu ka soo xaroodaa dakhliga gudaha iyo deeqaha dibadda. Dakhliga Gudaha ayaa loo kala qaadaa dakhliga canshuraha iyo dakhliyada kale. Shaxda 2aad waxay isbarbardhigaysaa dakhliga dawladdu heshay bisha May ee sannadaha 2025 iyo 2024.

Faah-Faahin	Dhabta May 2025	Dhabta May 2024	Koror/ Naaqus
Dakhliga Gudaha & Deeqaha Dibadadda	**$63,187,058**	**$78,058,293**	**-19%**
Dakhliga Gudaha	**31,865,329**	**34,663,524**	**-8%**
Dakhliga Canshuuraha	**24,368,257**	**23,836,282**	**2%**
Canshuurta Dakhliga & Faa'iidooyinka	3,391,570	4,173,608	-19%
Canshuurta Adeegga & Agabka	5,886,079	4,091,786	44%
Canshuurta Ganacsiga Dibadda	13,306,736	13,796,514	-4%
Canshuuraha Kale	1,783,872	1,774,374	1%
Dakhliyada Kale	**7,497,072**	**10,827,241**	**-31%**
Dakhliga Hantida	28,140	48,307	-42%
Dakhliga Iibka Agabka iyo Adeegga	7,367,791	10,754,145	-31%
Ganaaxa, Ciqaabta	101,142	24,790	308%
DEEQAHA DIBADDA	**31,321,729**	**43,394,769**	**-28%**
Deeqaha laba dhinaclaha	928,489	9,123,434	-90%
Deeqaha Dhincacyada badan	30,393,240	34,271,335	-11%

Shaxda 2aad: Dhabta Dakhliga May 2025 & 2024

Sida ka muuqato shaxda 2aad dakhliga dawladda ayaa hoos u dhacay bisha May 2025, wuxuuna ka yar yahay **19%** wadarta dakhliga dawladda ee la helay bisha May 2024. Dakhliga gudaha ayaa hoos u dhacay **8%** bisha May 2025, halka deeqaha dibadda ay hoos u dhaceen **28%** marka la barbardhigo deeqda dawladda ee la helay bisha May 2024.

Dakhliga ugu badan ee la helay ayaa ahaa Dakhliga Canshuuraha wuxuuna kordhay **2%** dakhliga canshuuraha ee la helay bisha May 2025. Dakhliyada kale ayaa hoos u dhacay **31%** marka la barbardhigo dakhliyada kale ee la helay bisha May 2024. Sidoo kale, Deeqaha dibadda ayaa hoos u dhacay **28%** bisha May 2025 marka la barbardhigo deeqaha la helay bisha May 2024.

Canshuurta Agabka iyo Adeega ee la soo uruuriyey bisha May 2025 dakhli dhan $5.8M wuxuuna ka badan **44%** Canshuurta Agabka iyo Adeega ee la helay bisha May 2024. Kororka ugu badan ee canshuurtaan wuxuu ka yimid kororka canshuurta gadista ee laga qaado suuqyada magaalada Muqdisho, waxaana la helay $**1.7M** oo koror ah kana timid canshuurta gadista ah ee suuqyada magaalada. Canshuurta Gadista ee suuqyada ayaa labilaabay saddex biloodlihii ugu danbeeyey ee sannadka 2024.



Jaantuska 1aad: Dakhliga Dawladda – Bisha May 2024 & 2025

Sida ka muuqata Jaantuska 1aad Dakhliga Gudaha ee la helay bisha May 2025 ayaa la helay $32M wuxuuna ka hoosaaya $2.8M dakhliga gudaha la helay bisha May 2024. Deeqaha dibada ee la helay bisha May 2025ayaa la helay $31M wuxuuna ka hoosaaya $**12M** deeqaha dibadda ee la helay bisha May 2024.

Bisha May 2025, deeqaha dibadda ayaa laga kala helay, Imaaraadka Carabta oo laga helay dakhli ku dhaw **928K**, Bangiga Adduunka oo laga helay lacag ka badan **30M** iyo Bangiga Horumarinta Afrika **32k** bisha May 2025.

DAKHLIGA GUDAHA

Odoroska miisaaniyad sannadeedka dakhliga gudaha ayaa ah $**430M**, waxaana la helay bilaha Janaayo ilaa May 2025 dakhli dhan $**153M** oo u dhiganta **36%** miisaaniyad sannadeedka dakhliga gudaha. Iskudarka Dakhliga Gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa May ee sannadka 2025 ayaa **2%** ka badan dakhliga gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa May ee sannadka 2024.



Jaantuska 2aad: Isbarbardhig Dhakhliga Gudaha – bilaha Jan-May 2024 & 2025

Sida ka muuqata jaantusta 2aad, wuxuu muujinayaa isbarbardhig dakhliga gudaha ee la helay bilaha Jan ilaa May ee sanadaha 2024 iyo 2025. Bisha April ee sannadka 2025 dakhliga gudaha ayaa kororka ugu badnaa sameeyey, waxaana la helay $27M oo ka badan 14% dakhliga gudaha ee la helay bisha April 2024.

Bisha May 2025 waxaa la soo uruuriyey dakhli dhan $32M, wuxuuna ka hoosaayaa 8% wadarta dakhliga gudaha ee la soo uruuriyey bisha May 2024.

Bisha Janaayo ee sannadaha 2024 iyo 2025 waxaa la soo uruuriyey 27M, mana jirin koror la helay bisha Janaayo 2025.



Jaantuska 3aad: Dakhliga Gudaha Jan-May 2025

Dakhliga Canshuuraha ee la helay bisha May 2025 ayaa kordhay **2%** marka la barbardhigo dakhliga canshuuraha ee la helay bisha May 2024, halka dakhliyada kale ee la helay bisha May ee sannadka 2025 uu jiro Hoos u dhac **31%** marak loo fiiriyo dakhliyada kale ee la helay bisha May 2024.

Sida ka muuqata jaantuska 3aad, iskudarka dakhliga gudaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa May ee sannadka 2025, wuxuu **74%** kasoo xarooday dakhliga cashuuraha, halka **26%** kasoo xarooday dakliyada kale.

DAKHLIGA CANSHUURAHA

Dakhliga Canshuuraha ayaa loo kala qaadaa 4 qaybood oo kale ah; Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidooyinka, Canshuurta Agabka iyo Adeega, Canshuurta Ganacsiga Dibadda iyo Canshuuraha kale. Canshuurta ugu badan dakhliga gudaha ayaa ah Canshuurta Ganacsiga Dibadda.

Faah-Faahin	Dakhliga Jan-May 2025	Dakhliga Jan-May 2024	Koror/ Naaqus
Dakhliga Gudaha	**$ 153,159,825**	**$ 150,503,518**	**2%**
Canshuuraha	**113,061,621**	**106,697,569**	**6%**
Canshuurta Dakhliga & Faa'iidooyinka	22,558,944	15,486,536	46%
Canshuurta Agabka & Adeegga	23,215,113	19,869,020	17%
Canshuurta Ganacsiga Dibadda	62,914,181	67,206,208	-6%
Canshuuraha Kale	4,373,385	4,135,805	6%
Dakhliyada Kale	**40,098,203**	**43,805,950**	**-8%**
Dakhliga Hantida	252,409	320,354	-21%
Dakhliga Iibka Agabka iyo Adeegga	39,427,555	43,382,234	-9%
Ganaaxa, Ciqaabta	418,239	103,362	305%

Shaxda 3aad: Iskudarka Dakhliga Gudaha ee Jan-May ee Sannadaha 2025 & 2024

CANSHUURTA DAKHLIGA IYO FAA'IIDOOYINKA

Canshuuraha Dakhliga iyo Faa'iidooyinka, waxayna ka tahay **20%** dhabta Dakhliga Canshuuraha ee la helay bilaha Jan-May ee sannadaha 2025. Canshuurtaan ayaa laga qaadaa dakhliga soo gala qofka iyo shirkadaha, waxayna ka kala timaadaa, canshuurta mushaarka shaqaalaha Dawladda iyo kuwa gaarka ah, canshuurta dakhliga kirooyinka daaraha iyo canshuurta faa'iidada shirkadaha.

Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidooyinka ayaa kordhay **46%** bilaha Jan-May sannadka 2025, waxaana la helay dakhli dhan **$22M**, halka bilaha Janaayo ilaa May ee sannadka 2024 la helay $**15.6M** oo ka hooseeyo canshuurta la helay sannadkaan. Canshuurta Faa'iidada Shirkadaaha ayaa laga helay bilaha Jan-May 2025 koror dhan $**4M** una dhigma **64%** ka badan canshuurta Faa'iidada Shirkadaha ee la helay sannadka 2024. Sidoo kale canshuurta kirada daaraha ayaa laga helay koror dhan $**1M** una dhigtanta **22%** wadarta kororka la helay ee canshuurtaan, Canshuruurta Mushaarka shaqaalaha ayaa la helay koror dhan $**1.2M** oo u dhigma **17%** koroka Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidooyinka ee la hela bilaha Janayo ilaa May 2025.

CANSHUURTA AGABKA IYO ADEEGA

Waxaa la helay bilaha Jan-May dakhli dhan $**23M** oo ka badan **17%** iskudarka Canshuurta Agabka iyo Adeega ee la helay bilaha Janaayo ilaa May 2024. Waxayna ka tahay **21%** wadarta Dakhliga Canshuuraha. Waxaa laga qaadaa canshuurtaan ganacsiyada dalka waxaa ka mid ah; canshuurta gedista ee suuqyada, canshuurta wadamarista gawaarida iyo canshuurta gedista ee laga qaado shirkadaha bixiya adeegyada.

Canshuurta gadista ee badeecadaha kasoo daga dekadda iyo canshuurta gadista ee laga qaado suuqyada ayaa laga helay bilaha Jan-May 2025 dakhli dhan $**16.3M** oo u dhiganta **70%** wadarta Canshuurta Agabka iyo Adeega, Canshuuraha Wado-marista iyo Nootaayooyinka ayaa laga helay $**2.3M** oo u dhiganta **10%** wadarta Canshuurta Agabka iyo Adeega ee la soo uruuriyey bilaha Jan-May 2025.

CANSHUURTA GANACSIGA DIBADDA

Waa canshuurta laga qaado badeecadaha kasoo daga Dekadda iyo Garoonka Diyaraadaha Muqdishu. Waana dakhliga ugu muhiimsan dakhliga dawladda kasoo galo gudaha dalka.

Bilaha Janaayo ilaa May ee sannadka 2025 waxaa ka soo xarooday dakhli dhan $**63M** oo u dhiganta **56%** wadarta Dakhliga Canshuuraha, waxayna ka tahay **43%** wadarta miisaaniyad sannadeedka Dakhliga Gudaha.

CANSHUURAHA KALE

Miisaaniyad sannadeedka Canshuuraha kale ayaa ah $**15M**, waxaana ka soo xarooday bilaha Jan-May 2025 dhakhli dhan $**4.4M** oo dhiganta **4%** wadarta Dakhliga Canshuuraha. Waxay ka soo xarootaa canshuuraha laga qaado badqabka gawaarida, farankaboolada qaansheegooyinka ganacsiga ee adeegyada ama badeecadaha kasoo daga furdooyinka.

Iskudarka Canshuuraha kale ee la soo uruuriyey bilaha Janaayo ilaa May ee sannadka 2025 ayaa **6%** uu kordhay marka la barbardhigo canshuuraha kale la helay bilaha Janaayo ilaa May ee sannadka 2024.



Jaantuska 4aad: Dakhliga Canshuuraha Jan-May 2025 & 2024

Sida ka muuqato jaantuska 4aad oo soo bandhigaayo isbarbardhigaayo qaybaha dakhliga canshuuraha ee la helay bilaha Janaayo ilaa May ee sannadaha 2025 iyo 2024. Wuxuu kaloo muujinyaa kororka iyo naaquska qaybaha dakhliga canshuuraha marka la is barbardhigo qaybaha dakhliga canshuuraha ee la helay bilaha Janaayo ilaa May ee sannadaha 2025 iyo 2024.

DAKHLIYADA KALE

Dakhliyada kale, waa dakhli ka soo xarooda adeegyada maamul oo ay bixiso dawladda, sida bixinta shaatiyada ganacsiga, adeegyada dekadda iyo garoonka diyaaradaha, bixinta baasaboorada, iyo dalkugalka ajaanibta. Waxaa ka soo xarooday bilaha Jan ilaa May 2025 dakhli dhan $**40.1M**, wuxuuna ka hoosaaye **8%** dakhliyada kale ee la helay bilaha Janaayo ilaa May 2024.

Dakhliyada kale ee lasoo uruuriyey bilaha Janaayo ilaa May 2025, waxaa $**12.4M** oo dhiganta **31%** wadarta dakhliyada kale kasoo xarootay adeegyada maamul dawladda ka bixiso Dekadda iyo Groonka diyaaradaha Magaalada Muqdisho. Bixinta Baasaboorada iyo dalkugalka ajaanibta waxaa ka soo xarooday dakhli dhan **$7M** oo dhiganta **17%** wadarta dakhliyada kale. Diyaaradaha mara hawada soomaaliya waxaa laga helay $**8.5M** oo dhiganta **21%** wadarta Dakhliyada Kale ee la helay bilah Janaayo ilaa May 2025. Khidmaha Isgaarsiinta ayaa laga helay $**2.6M** oo u dhiganta **7%** wadarta dakhliyada kale.

Sidoo kale dakhliga laga helay Dakhliga Hantida ee la helay bilaha Janaayo ilaa May ee sannadka 2025 ayaa ka hooseeyaa **21%** dakhligii hantida ee la helay bilaha Janaayo ilaa May ee sannadka 2024. Sida ka muuqata shaxda 3aad, iskudarka dakhliga kasoo xarooday Ganaaxa iyo Ciqaabta ayaa kordhay **305**% bilaha Janaayo ilaa May 2025, waxaana la helay dakhli dhan $**418K**, halka bilaha Janaayo ilaa April ee sannadka 2024 la helay dakhli dhan $**103K**.

DEEQAHA DIBADDA

Deeqaha Dibadda oo ka ah **68%** wadarta dakhliga miisaaniyadda dawladda, waxaa la helay $**100M** oo u dhiganta **11%** miisaaniyad sannadeedka deeqaha dibadda. Wadarta deeqaaha dibadda ee la helay bilaha Janaayo ilaa May 2025 ayaa hoos u dhacay **9%**, makra loo fiiriyo wadarta deeqaha dibadda ee la helay bilaha Janaayo ilaa May2024. Deeqaha dhinacyada badan ayaa la helay dakhli dhan $**88M** oo **6%** ka yaryahay deeqaha dhinacyada badan ee la helay bilaha Janaayo iilaa May 2024. Deeqaha laba dhinaclaha ah ayaa la helay $**12M** oo ka yartahay **23%** wadarta deeqaha laba dhinacalaha ee la helay bilaha Janaayo ilaa May 2024.

Faah-Faahin	Dhabta Jan-May 2025	Dhabta Jan-May 2024	Koror/Naaqus
DEEQAHA DIBADDA	**$ 100,325,982**	**$ 109,695,219**	**-9%**
Deeqaha laba dhinaclaha	**12,140,922**	**15,703,868**	**-23%**
Turkiga	7,500,000	7,500,000	0%
Imaaraatka Carabta	4,640,922	8,203,868	-43%
Deeqaha Dhincacyada badan	**88,185,060**	**93,991,351**	**-6%**
Bangiga Adduunka	83,991,186	91,499,922	-8%
Bangiga Harumarinta Afrika	2,504,067	2,151,757	16%
Qaramada Midoobay	1,295,658	-	0%
Hay'ada Waxbarashada Addunnka (GPE)	394,150	339,672	16%

Shaxda 4aad: Deeqaha Dibadda Jan-May 2025 iyo 2024

Deeqaha dibadda waxay isugu jirataa deeq kab miisaaniyadeed oo ay dawladdu ka hesho hay'do caalami ah iyo dawladaha kabo miisaaniyadda dawladda iyo kab mashaariic oo loogu talagalay in lagu maalgaliyo mashaariic laga fuliyo dalka gudahiisa.

Deeqaha labo dhinaclaha ah waxaa la helay bilaha Janaayo ilaa May 2025 deeq dhan **$12M** oo **23%** ka yartahay deeqaha labo dhicanlaha ah ee la helay bilaha Janaayo ilaa May 2024. Dawladda Turkiga ayaa laga helay $**7.5M** oo u dhiganta **62%**, halka Imaaraatka Carabta laga helay $**4.6M** oo u dhiganta **38%** wadarta deeqaaha labo dhinaclaha ah ee la helay bilaha Janaayo ilaa May 2025.

Deeqaha dhinacyada badan ee la helay bilaha Janaayo ilaa May 2025 ayaa ah $**88M**, waxayna **6%** ka hoosaysa deeqaha dhinacyada badan ee la helay bilaha Janaayo ilaa May 2024. Deeqaha dhincayada ee la helay bilaha Janaayo ilaa May 2025 waxaa **95%** dawladda ugu deeqay Bangiga Adduunka, halka **5%** dawladda ugu deeqeen hay'adaha kale duwan sida ka muuqato shaxda 4aad.



Jaantuska 5aad: Isbarbardhig Deeqaha Dibadda Jan-May - 2024 & 2025

Deeqaha dibadda ee la helay bilaha Jan-Mar ee sannadka 2025 ayaa ka badan deeqaha dibadda ee la helay bilaha Jan-Mar 2024. Bisha Mar 2025 ayaa la helay deeq dhan 34M waxayna ka badan tahay 110% deeqadii la helay bisha Maarso 2024. Bilaha April iyo May 2025 ayaa la helay deeq ka hoosaysa deeqdii la helay bilaha April iyo May 2024. Bisha April 2025 ayaa la helay 4M waxayna ka hosaysaa 90% deeqdii la helay bisha April 2024. Sido klae bisha May 2025 ayaa la helay deeq dhan 31M waxayna ka hosaysaa 28% wadarta deeqaha dibadda ee la helay bisha May 2024.

Dhabta Kharashaadka Jan-May iyo Miisaaniyadda Sannadka 2025

Faah-Faahin	Dhabta May 2025	Dhabta Jan-May 2025	Kutalagalka Danbe	Kutalagalka Hore	% Fulinta Kutalgalka Danbe
KHARASHKA GUUD	**$66,577,042**	**$291,824,493**	**$1,359,714,328**	**$1,359,714,328**	**21%**
Kharashaadka Joogtada	**49,290,259**	**220,063,060**	**631,414,868**	**628,053,674**	**35%**
Mushaarka Shaqaalaha	33,331,566	147,471,111	365,796,085	365,755,765	40%
Isticmaalka Agabka & Adeega	10,016,927	41,949,896	137,152,906	139,587,608	31%
Dulsaarka	1,754,614	2,847,741	13,800,000	13,800,000	21%
Kaalmo Dhaqaale	-	-	-	-	0%
Deeqaha	-	-	90,641,266	91,641,266	20%
Faa'idada Bulshada	-	-	-	-	0%
Hantida aan Maaliyadda ahayn	3,890,889	17,776,087	24,024,610	17,269,034	42%
Kharashaadka Mashaariicda	**17,286,783**	**71,761,432**	**728,299,460**	**731,660,654**	**10%**
Mushaarka Shaqaalaha	387,724	1,414,369	4,868,440	4,244,860	29%
Isticmaalka Agabka & Adeega	8,060,156	29,333,295	256,789,537	256,865,498	11%
Kaalmo Dhaqaale	-	172,511	14,620,000	13,280,000	1%
Deeqaha	4,267,396	18,527,647	143,544,880	147,022,709	13%
Faa'idada Bulshada	-	-	77,000,000	77,000,000	0%
Kharashaadka Kale	-	11,728,705	64,427,668	68,416,928	18%
Hantida aan Maaliyadda ahayn	4,571,506	10,584,904	167,048,934	164,830,659	6%

Shaxda 5aad: Dhabta Jan-May 2025 & Miisaaniyadda Kharashaadka Guud Dawladda,

Kharashaadka dawladda waxaa loo kala qaadaa, kharashaadka joogtada ah iyo Mashaariicda. Kharashaadka joogtada ah waa kharashaadka dawladda ee laga maalgaliyo Dakhliga Gudaha iyo kabka miisaaniyadadeed oo ay dawladdu ka hesho deeqaha dibabadda. Waxaa laga bixiyaa kharashaadka socodsiina hawalaha dawaldda, sida mushaaraadka shaqaalaha Dawladda, isticmaalka Agabka iyo Adeega ee hay'adaha Dawaldda. Kharashaadka Mashaariicda waxaa laga maaligaliyaa kab mashaariicda ee dawladda ka hesho deeqaha dibadda.

Kharashka Bisha May 2025

Sida ka muuqata shaxda 4aad waxaa la bixiyey bisha May 2025 kharash dhan $**66M**, kharashaadka joogtada ah waxaa laga bixiyey $**49M** oo u dhiganta **74%** wadarta kharashaadka guud, halka kharashaadka mashaariicdana la bixiyey $**17M** oo u dhiganta **26%** wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bisha May 2025.

Mushaarka shaqaalaha ayaa ugu badan kharashaadka la bixiyey bisha May waxaana la bixiyey $**33M** oo u dhiganta **%68** wadarta kharashaadka joogtada ee la bixiyey. Kharashaadka Agabka iyo adeega ayaa la bixiyey $**10M** oo u dhigtanta **20%** wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha May 2025.

Kharashaadka mashaariicda ayaa bixiyey bisha May 2025 kharash dhan $**17M**, kharashaadka agabka iyo adeegay ayaa la bixiyey $**8M** oo u dhigtan **47%** wadarta kharashadka mashaariicda ee la bixiyey bisha May 2025. Deeqaha la siiyo dawlad goboleedyada dalka ayaa lagu bixiyey $**4M** oo u dhiganta **25%** wadarta kharashadka mashaariicda ee la bixiyey bisha May 2025.

Kharashaadka Jan-May 2025

Iskudarka kharashaadka la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2025 ayaa ahayd $**292M** oo u dhiganta **21%** miisaaniyadda kharashaadka guud ee sannadka 2025. Kharashaadka Joogtada ah ayaa la bixiyey $**220M** oo u dhiganta **35%** miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah, halka mashaariicda laga bixiyey $**72M** oo u dhiganta **10%** miisaaniyadda kharashaadka mashaariicda ee sannadka 2025.

Kharashaadka Jogtada ah

Mushaaraadka shaqaalaha dawladda ayaa la bixiyey $**147M** oo u dhigant **40%** miisaaniyadda Mushaarka shaqaalaha ee miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah, wuxuuna ka yahay **67%** wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2025. Kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeega ayaa la bixiyey $**42M** oo u dhiganta **31%** miisaaniyadda Isticmaalka Agabka iyo Adeega ee miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah. Wuxuuna **19%** ka yahay wadarta kharashaadka joogtada ee la bixiyey. Kharashaadka soo iisbsashada hantida aan maaliyadda ahayn ayaa la bixiyey $**10.M** oo u dhiganta **42%** misaaniyadda sannadka ee kharashaadka joogtada ah, waxayna ka tahay **8%** wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Jan ilaa May 2025.



Jaantuska 6aad: Isbarbardhig Kharashaadka Joogtada - bilaha Jan-May - 2024 & 2025

Sida ka muuqato jaantuska 6aad oo soo bandhigaya isbarbardhigaya kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May ee sannadaha 2025 & 2024.

Bisha Febraayo ee sannadka 2025 waxaa la bixiyey $55M oo ka badan 40% kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha Febraayo 2024. Sidoo kale bisha Maarso 2025 waxaa la bixiyey $45M oo ka badan 28% wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha Maarso 2024. Bisha May 2025 waxaa la bixiyey $49M oo ka badan 3% wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha May 2024, halka bisha Janaayo ee sannadka 2025 la bixiyey kharash ka hosseya 4% wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bisha Janaayo 2024.

Kharashaadka Mashaariicda

Iskudarka Kharashaadka mashariicda ee la bixiyey bilaha Jan ilaa May ayaa ahayd $**72M** oo u dhiganta **10%** miisaaniyadda sannadka ee kharashaadka mashaariicda. Kharashaadka Agabka iyo Adeega ayaa la bixiye $**29** oo u dhiganta **11%** miisaaniyadda sannadka, waxayna ka tahay **41%** wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2025.

Deeqaha la siiyo dawlad goboleedyada ayaa la bixiyey $**19M** oo u dhiganta **13%** miisaaniyadda sannadka, waxayna ka tahay **25%** wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2025.



Jaantuska 7aad: Kharashaadka Mashaariicda, Bilaha Jan-May - 2024 & 2025

Sida ka muuqata jaantuska 7aad, wuxuu isbarbardhig ku samaynayaa kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Jan ilaa May ee sannadaha 2024 & 2025.

Bisha Maarso 2025 ayaa la bixiyey kharashka ugu badan, waxaana la bixiyey $42M oo ka badan 254% wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bisha Maarso 2024. Bisha April 2025 waxaa la bixiyey kharash dhan $4M oo ka hoosaysa 90% wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bisha April 2024. Sida ka muuqata jaantuska bilaha Jan iyo Feb ee sannadka 2025 waxaa la bixiyey kharash ka badan wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Jan iyo Feb ee sannadka 2024.

Isbarbardhig Kharash Bixinta Bisha May ee 2025 & 2024

Faahfaahin	Dhabta May 2025	Dhabta May 2024	Increase/ Decreas
Wadarta Kharashaadka Guud	**$ 66,577,042**	**$ 62,525,795**	**6%**
Kharashaadka Joogtada	**49,290,259**	**47,926,488**	**3%**
Mushaarka Shaqaalaha	33,331,566	34,105,647	-2%
Isticmaalka Agabka & Adeega	10,016,927	8,684,953	15%
Dulsaarka	1,754,614	-	0%
Deeqaha	-	-	0%
Hantida aan Maaliyadda Ahayn	3,890,889	5,090,058	-24%
Dib u bixin Daymaha/Horumaris	-	-	0
Kharashaadka Mashaariicda	**17,286,783**	**14,599,307**	**18%**
Mushaarka Shaqaalaha	387,724	133,253	191%
Isticmaalka Agabka & Adeega	8,060,156	3,954,004	104%
Kaalmo Dhaqaale	-	-	0%
Deeqaha	4,267,396	9,958,797	-57%
Faa'iidada Bulshada	-	-	0%
Other Expenses	-	-	0%
Hantida aan Maaliyadda Ahayn	4,571,506	553,253	726%

Shaxda 6aad: Kharashaadka la bixiyey Bisha May 2025 iyo 2024

Sida ka muuqato shaxda 6aad oo isbarbardhigaysaa kharashaadkii la bixiyey bisha May ee sannadaha 2025 iyo 2024. Wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey ayaa kordhay **6%** bisha May 2025 marka loo barbardhigo wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bisha May ee sannadka 2024.

Sido kale wadarta kharashaadka joogtada ayaa la bixiyey bisha May 2025 ayaa kordhay **3%** marka loo fiiriyo wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bisha May ee sannadka 2024. Kharashaadka mashariicda ayaa la bixiyey $**17M**, waxayna **18%** ka saraysaa wadarta kharashaadka mashariicda ee la bixiyey bisha May 2024.

Kharashaadka joogtada ee Agabka iyo Adeega ee la bixiyey bisha May 2025 ayaa ahaa $**10M** oo **15%** kabadan kharashaadka joogtada ee Isticmaalka Agabka iyo Adeeg la bixiyey bish May 2024.

Dhammaan kharashaadka kale ayaa hoos u dhacay bisha May 2025, marka labarbardhigo kharashaadkii la bixiyey bisha May 2024.

Isbarbardhig Kharash Bixinta Bilaha Jan-May ee 2025 & 2024

Faahfaahin	Dhabta Jan-May 2025	Dhabta Jan-May 2024	Increase / Decreas
Wadarta Kharashaadka Guud	**$ 291,824,493**	**$ 261,833,486**	**11%**
Kharashaadka Joogtada	**220,063,060**	**191,510,079**	**15%**
Mushaarka Shaqaalaha	147,471,111	137,514,534	7%
Isticmaalka Agabka & Adeega	41,949,896	35,476,427	18%
Dulsaarka	2,847,741	920,544	209%
Kabka	-	-	0%
Deeqaha	17,776,087	17,236,824	3%
Faa'idada Bulshada	-	-	0%
Hantida aan Maaliyadda Ahayn	10,018,224	361,750	2669%
Dib u bixin Daymaha/Horumaris	-	-	0%
Kharashaadka Mashaariicda	**71,761,432**	**70,323,408**	**2%**
Mushaarka Shaqaalaha	1,414,369	949,079	49%
Isticmaalka Agabka & Adeega	29,333,295	19,615,322	50%
Kabka	172,511	2,596,403	-93%
Deeqaha	18,527,647	18,526,225	0%
Faa'idada Bulshada	-	26,740,000	-100%
Other expenses	11,728,705	-	0%
Hantida aan Maaliyadda Ahayn	10,584,904	1,896,378	458%

Shaxda 7aad: Iskudarka Kharashaadka la bixiyey Jan- May 2025 & 2024

Iskudarka kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2025 ayaa kordhay **11%**, marka la barbarhigo kharshaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo iyo May 2024. Kharashaadka joogtad ah ayaa kordhay **15%,** halka kharashaadka mashaariicda aya kordheen **2%** marka la barbardhigo iskudarka kharashaadkii la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2024.

Kharashaadka joogtada ah, Mushaaraadka shaqaalaha ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2025 ayaa kordhay **7%** marka loo barbardhigo mushaaraadka shaqaalaha ee la bixyey bilaha Janaayo ilaa May 2024. Kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ayaa kordhay **18%** bilaha Janaayo ilaa May 2025 marka la barbardhigo kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeega ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2024. Sidoo kale soo iibsashada hanti aan maaliyadda ahayn aad u kordhay bilaha Janaayo ilaa May 2025.

Kharashaadka laga bixiyey mashaariicda, waxaa kororka ugu badan sameeyey soo iibsashada hantida aan maaliyadda ahayn oo kordhay **458%** marka la barbardhigo kharashaadkkii soo iibsashada hantida aan maaliyadda ahayn ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2024. Sido kale waxaa aad u kordhay **50%** Isticmaalka Agab iyo Adeeg oo laga bixiyey kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2025 marka la barbardhigo Agab iyo Adeega la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2024.

DHABTA KHARASHAADKA JANAAYO ILAA MAY, HAY'ADAHA DAWLADDA

Shaxda shannaad waxaa ka muuqda dhabta kharashadka guud ee dawladda ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2025, iyadoo loo kala saaray qaybaha shaqo ee loo kala qaybiyo hay'adaha

Dawladda. Sidoo kale kharashaadka waxaa loo kala qaaday kharashaadka joogtada ah iyo mashaariicda. Bilaha Janaayo ilaa May 2025, waxaa la bixiyey kharash dhan $**292M** oo u dhiganta **21%** wadarta miisaaniyad sanadeedka kharashaadka Guud ee dawladda.

Faah-faahinta	Dhabta May 2025	Dhabta Jan-May 2025	Kutalagalka Danbe	Kutalagalka Hore	% Fulinta
KHARASHKA GUUD	**$ 66,577,042**	**$ 291,824,493**	**$ 1,359,714,328**	**$1,359,714,328**	**21%**
Kharashaadka Joogtada	**49,290,259**	**220,063,060**	**631,414,868**	**628,053,674**	**35%**
Hay'adaha Adeeg Maamulka	18,428,820	86,093,327	277,232,380	273,973,094	31%
Hay'adaha Adeeg Amniga	21,287,996	101,929,192	257,172,018	257,147,965	40%
Hay'daha Adeeg Dhaqaalaha	3,313,163	14,363,982	45,181,877	45,127,551	32%
Hay'adaha Adeeg Bulshada	6,260,281	17,676,560	51,828,592	51,805,063	34%
Kharashaadka Mashaariicda	**17,286,783**	**71,761,432**	**728,299,460**	**731,660,654**	**10%**
Hay'adaha Adeeg Maamulka	4,808,530	27,046,209	161,273,157	164,634,351	17%
Hay'adaha Adeeg Amniga	-	-	-	-	0%
Hay'daha Adeeg Dhaqaalaha	8,616,885	24,065,353	289,506,013	289,506,013	8%
Hay'daha Adeeg Bulshada	3,861,367	20,649,871	277,520,289	277,520,289	7%

Shaxda 8^{aad}: Dhabta Kharashaadka, Hay'adaha Dawladda

KHARASHAADKA JOOGTADA AH

Kharashka ugu badan ee la bixiyey waxaa laga bixiyey miisaaniydda kharshaadka joogtada ah, waxaana la bixiyey kharash dhan $**220M** oo u dhiganta **35%** wadarta miisaaniyad sannadeedka kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2025. Kharashaadka joogtada ee la bixiye ayaa ahaa **75%** ka ahaa wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2025.

Iskudarka bilaha Janaayo ilaa May ayaa Hay'adaha Amniga lagu bixiyey $**102M** oo u dhiganta **40%** miisaaniyadda sannadka ee kharashaadka joogtada ah. Miisaaniyada Hay'adaha Adeega Maamulka ayaa lagu bixiyey $**86M** oo u dhiganta **31%** miisaaniyad sannadeedka kharshaadka joogtada ah ee Hay'adaha Adeega Maamulka. Hay'adaha Dhaqaalaha iyo Bulshada ayaa lagu bixiyey $**14M** oo u dhiganta **32%,** Hay'adaha Bulshada miisaaniyad ayaa lagu bixiyey $**18M** oo u dhiganta **34%** sannadeedka Hay'adaha Bulshada.

Kharashaadka ugu badan ee miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah ee la bixiye bilaha Janaayo ilaa May 2025 waxaa lagu bixiyey Hay'adaha Amniga, waxaana ku baxday **46%** wadarta kharashaadka joogtada ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2025. Hay'adaha maamulka ayaa lagu bixiyey kharash labaad ee ugu badan waxaana ku baxday **39%** kharashaadka, Ha'aydada Bulshada ayaa lagu bixiyey **8%**, halka Hay'adaha dhaqaalaha lagu bixiyey **7%** wadarta kharashaadka la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2025.

KHARASHAADKA MASHAARIICDA

Kharashaadka Mashaariicda ayaa lagu bixiyey $**72M** oo u dhiganta **10%** miisaaniyad sannadeedka kharashaadka mashaariicda, waxayna ka tahay **25%** wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey bilaha Janaayo ilaa May 2025.

Mashaariicda hoos yimaad hay'adah maamulka ayaa lagu bixiyey $**27M** una dhiganta **17%** miisaaniyadda mashaariicda ee hay'adaha Maamulka. Mashaariicda hoos yimaada dhaqaalaha ayaa lagu bixiyey $**24M** oo u dhiganta **8%** miisaaniyada mashaariicda ee hay'adaha dhaqaalaha.

DHAMAAD

Lifaaqa 1aad: Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Joogtada ah, Jan-May 2025

Code	Decriptions	Iskudarka Kharshaadka Jan-May 2025	Kutalagalka Danbe	Kutalagalka Hore	% Fulinta Kutalagalka Danbe
010100	**Xafiiska Madaxtooyada**	**$ 4,512,092**	**$ 12,417,171**	**$ 12,529,086**	**36%**
21	**Mushaarka Shaqaalaha**	**2,456,015**	**6,550,197**	**6,662,112**	**37%**
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	407,977	956,763	1,012,068	43%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	2,024,188	5,536,194	5,592,804	37%
2114	Kharshaadka kale ee Shaqaalaha	23,850	57,240	57,240	42%
22	**Isticmaalka Agabka iyo Adeegga**	**2,056,077**	**5,834,203**	**5,834,203**	**35%**
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	598,373	1,425,000	1,425,000	42%
2221	Hawlaha Guud	107,828	323,492	323,492	33%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	245,976	737,959	737,959	33%
2224	Agabka iyo Alaabaha	6,232	18,700	18,700	33%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	-	36,000	36,000	0%
2231	Kirooyin	20,000	60,000	60,000	33%
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	750,400	2,251,200	2,251,200	33%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	327,268	981,852	981,852	33%
26	**Deeqaha**	**-**	**32,771**	**32,771**	**0%**
2621	Deeqaha Joogtada ee La Siiyo Hay'adaha Caalamiga ah	-	32,771	32,771	0%
010201	**Xafiiska Golaha Shacabka**	**11,139,577**	**27,949,571**	**27,893,681**	**40%**
21	**Mushaarka Shaqaalaha**	**9,218,120**	**22,419,330**	**22,363,440**	**41%**
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	882,155	2,155,830	2,095,620	41%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	8,335,965	20,263,500	20,267,820	41%
22	**Isticmaalka Agabka iyo Adeegga**	**1,498,778**	**4,494,476**	**4,494,476**	**33%**
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	236,320	720,000	720,000	33%
2221	Hawlaha Guud	62,138	295,250	295,250	21%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	163,840	491,520	491,520	33%
2224	Agabka iyo Alaabaha	78,399	235,200	235,200	33%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	83,841	251,526	251,526	33%
2231	Kirooyin	121,800	243,600	243,600	50%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	752,440	2,257,380	2,257,380	33%
31	**Soo Iibsasho Hantida aan Maaliyadda ahayn**	**422,679**	**1,035,765**	**1,035,765**	**41%**
3113	Hantida kale ee Maguurtada ah	422,679	1,035,765	1,035,765	41%
010202	**Xafiiska Aqalka Sare**	**2,750,838**	**8,003,196**	**7,973,196**	**34%**
21	**Mushaarka Shaqaalaha**	**1,942,000**	**4,723,296**	**4,723,296**	**41%**
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	66,225	161,280	161,280	41%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	1,875,775	4,562,016	4,562,016	41%
22	**Isticmaalka Agabka iyo Adeegga**	**759,600**	**2,275,900**	**2,245,900**	**33%**
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	65,600	196,800	196,800	33%

2221	Hawlaha Guud	42,200	147,600	147,600	29%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	89,000	267,000	267,000	33%
2224	Agabka iyo Alaabaha	116,400	289,200	259,200	40%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	-	36,000	36,000	0%
2231	Kirooyin	64,800	194,400	194,400	33%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	381,600	1,144,900	1,144,900	33%
31	**Soo Iibsasho Hantida aan Maaliyadda ahayn**	**49,238**	**1,004,000**	**1,004,000**	**5%**
3111	Dhismooyinka iyo Qaabdhismeedka	49,238	900,000	900,000	5%
3113	Hantida kale ee Maguurtada ah	-	104,000	104,000	0%
010300	**Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha**	**4,591,955**	**11,691,791**	**10,610,236**	**39%**
21	**Mushaarka Shaqaalaha**	**1,389,986**	**3,687,867**	**3,689,352**	**38%**
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	389,615	947,754	928,584	41%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	992,836	2,719,713	2,740,368	37%
2114	Kharshaadka kale ee Shaqaalaha	7,535	20,400	20,400	37%
22	**Isticmaalka Agabka iyo Adeegga**	**3,156,383**	**7,503,924**	**6,420,884**	**42%**
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	390,000	1,020,000	1,020,000	38%
2221	Hawlaha Guud	133,080	399,400	399,400	33%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	206,579	619,748	619,748	33%
2224	Agabka iyo Alaabaha	66,744	200,244	200,244	33%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	-	40,000	40,000	0%
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	1,900,920	3,903,240	2,848,200	49%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	459,060	1,321,292	1,293,292	35%
31	**Soo Iibsasho Hantida aan Maaliyadda ahayn**	**45,586**	**500,000**	**500,000**	**9%**
3113	Hantida kale ee Maguurtada ah	45,586	500,000	500,000	9%
010400	**Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga**	**1,353,125**	**4,190,468**	**4,028,603**	**32%**
21	**Mushaarka Shaqaalaha**	**1,002,350**	**2,698,305**	**2,551,020**	**37%**
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	706,305	1,774,800	1,696,680	40%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	296,045	923,505	854,340	32%
22	**Isticmaalka Agabka iyo Adeegga**	**350,775**	**1,492,163**	**1,477,583**	**24%**
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	119,875	480,000	480,000	25%
2221	Hawlaha Guud	43,995	132,083	132,083	33%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	-	96,000	96,000	0%
2224	Agabka iyo Alaabaha	16,243	97,500	97,500	17%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	1,332	16,160	16,160	8%
2231	Kirooyin	-	81,000	81,000	0%
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	161,500	495,420	480,840	33%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	7,830	94,000	94,000	8%
010401	**Safaaradaha**	**1,890,732**	**5,399,729**	**5,381,729**	**35%**

21	**Mushaarka Shaqaalaha**	**1,446,820**	**4,545,120**	**4,518,300**	**32%**
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	527,520	1,730,295	1,714,860	30%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	919,300	2,814,825	2,803,440	33%
22	**Isticmaalka Agabka iyo Adeegga**	**443,912**	**854,609**	**863,429**	**51%**
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	-	31,500	264,000	0%
2221	Hawlaha Guud	-	66,925	166,925	0%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	-	39,327	159,327	0%
2224	Agabka iyo Alaabaha	-	49,327	89,327	0%
2231	Kirooyin	-	44,475	86,925	0%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	443,912	623,055	96,925	71%
010500	**Wasaaradda Maaliyadda**	**7,093,858**	**17,205,876**	**16,661,302**	**41%**
21	**Mushaarka Shaqaalaha**	**4,771,132**	**11,381,577**	**11,332,932**	**42%**
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	1,700,311	4,122,258	4,043,580	41%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	2,968,471	7,012,959	6,994,992	42%
2114	Kharshaadka kale ee Shaqaalaha	102,350	246,360	294,360	42%
22	**Isticmaalka Agabka iyo Adeegga**	**2,217,191**	**5,324,299**	**4,828,370**	**42%**
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	284,202	480,000	480,000	59%
2221	Hawlaha Guud	249,484	821,320	821,320	30%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	60,666	60,667	216,000	100%
2224	Agabka iyo Alaabaha	71,928	216,000	940,507	33%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	291,344	940,507	365,599	31%
2231	Kirooyin	71,707	365,599	384,000	20%
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	212,700	384,000	300,000	55%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	438,357	735,262	1,320,944	60%
31	**Soo Iibsasho Hantida aan Maaliyadda ahayn**	536,804	1,320,944	**500,000**	41%
3113	Hantida kale ee Maguurtada ah	**105,535**	**500,000**	500,000	**21%**
010501	**Xafiiska Xisaabiyaha Guud**	**1,336,762**	**3,430,309**	**3,413,164**	**39%**
21	**Mushaarka Shaqaalaha**	**1,145,988**	**2,771,505**	**2,754,360**	**41%**
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	323,385	809,940	789,060	40%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	642,428	1,529,145	1,532,880	42%
2114	Kharshaadka kale ee Shaqaalaha	180,175	432,420	432,420	42%
22	**Isticmaalka Agabka iyo Adeegga**	**190,774**	**658,804**	**658,804**	**29%**
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	4,758	36,874	36,874	13%
2221	Hawlaha Guud	56,046	174,950	174,950	32%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	6,624	36,050	36,050	18%
2224	Agabka iyo Alaabaha	87,061	275,930	275,930	32%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	-	15,000	15,000	0%
2231	Kirooyin	13,422	48,000	48,000	28%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	22,863	72,000	72,000	32%
010502	**Adeega Guud ee Dowladda**	**25,207,741**	**121,611,525**	**125,322,973**	**21%**
22	**Isticmaalka Agabka iyo Adeegga**	**4,323,630**	**15,232,573**	**18,944,021**	**28%**

2243	Adeegyadda Bangiga	4,323,630	13,678,207	13,678,207	32%
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	-	7,864	265,814	0%
2291	Kharashka kutalagalka Lama Filaan	-	1,546,502	5,000,000	0%
24	**Dulsaarka**	**2,847,741**	**13,800,000**	**13,800,000**	**21%**
2411	Dulsaarka la Siinayo Dadka aan Deganayn Dalka	2,847,741	13,800,000	13,800,000	21%
26	**Deeqaha**	**17,776,087**	**90,108,495**	**90,108,495**	**20%**
2621	Deeqaha Joogtada ee La Siiyo Hay'adaha Caalamiga ah	4,171,581	8,594,000	8,594,000	49%
2631	Deeqaha Joogtada ah ee La Siiyo Qaybaha Kale ee Dowladda	13,604,506	81,514,495	81,514,495	17%
31	**Soo Iibsasho Hantida aan Maaliyadda ahayn**	**260,283**	**2,470,457**	**2,470,457**	**11%**
3111	Dhismooyinka iyo Qaabdhismeedka	-	300,000	300,000	0%
3112	Qalabka iyo Mashiinadda	60,283	370,457	370,457	16%
3113	Hantida kale ee Maguurtada ah	200,000	1,400,000	1,400,000	14%
3114	Nidaamyada Hubka	-	200,000	200,000	0%
3144	Hantida aan Qiimo Dhicin ee an la Taaban Karin	-	200,000	200,000	0%
010503	**Xarunta Warbixinnada Maaliyadeed ee Soomaaliya**	**337,222**	**997,837**	**1,004,452**	**34%**
21	**Mushaarka Shaqaalaha**	**303,120**	**741,837**	**748,452**	**41%**
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	99,150	236,637	243,252	42%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	203,970	505,200	505,200	40%
22	**Isticmaalka Agabka iyo Adeegga**	**34,102**	**256,000**	**256,000**	**13%**
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	4,858	120,000	120,000	4%
2221	Hawlaha Guud	19,497	60,000	60,000	32%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	3,750	15,000	15,000	25%
2224	Agabka iyo Alaabaha	5,997	24,000	24,000	25%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	-	1,000	1,000	0%
2231	Kirooyin	-	36,000	36,000	0%
010600	**Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha**	**902,138**	**2,796,158**	**2,757,998**	**32%**
21	**Mushaarka Shaqaalaha**	**729,192**	**1,977,231**	**1,939,836**	**37%**
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	384,112	979,701	939,336	39%
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	286,530	857,010	859,980	33%
2114	Kharshaadka kale ee Shaqaalaha	58,550	140,520	140,520	42%
22	**Isticmaalka Agabka iyo Adeegga**	**172,946**	**818,927**	**818,162**	**21%**
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	-	121,500	121,500	0%
2221	Hawlaha Guud	28,492	114,000	114,000	25%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	6,000	24,000	24,000	25%
2224	Agabka iyo Alaabaha	6,000	24,000	24,000	25%
2225	Dayactir iyo Hagaajin	-	2,666	2,666	0%
2231	Kirooyin	-	96,000	96,000	0%
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	98,455	300,765	300,000	33%

2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	33,999	135,996	135,996	25%
010601	**Hey'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya**	**372,998**	**1,308,394**	**1,304,029**	**29%**
21	**Mushaarka Shaqaalaha**	**119,470**	**288,765**	**284,400**	**41%**
2113	Gunnoyin Lacag Cadaan ah	119,470	288,765	284,400	41%
22	**Isticmaalka Agabka iyo Adeegga**	**253,528**	**1,019,629**	**1,019,629**	**25%**
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	-	24,000	24,000	0%
2221	Hawlaha Guud	4,998	20,000	20,000	25%
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	-	20,000	20,000	0%
2224	Agabka iyo Alaabaha	-	20,000	20,000	0%
2231	Kirooyin	-	48,000	48,000	0%
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	248,530	867,504	867,504	29%
